Sirta iyo Saamayna Sicirbararka.

W/Q: Cabdiqani Axmed Cali.

Qarnigii 17aad, Imbaraadooriyaddii Isbaanishka ayaa u duntay sicirbarar. 1974kii na Madaxweynihii Maraykanka ee Gerald Ford, ayaa sicirbararka ku sifeeyey cadowga koowaad ee Maraykanka. Waa weedha ugu caansan dhaqaalaha, waana mid kamid ah weedhaha ay ku ololeeyaan madaxda u ordaysa kursiga madaxweyninimada. Laakiin xaqiiqda biyo kama dhibcaanka ahi, waxa ay tahay, in kuwo badan siyaasadahoodu dhiirrigeliyaan sicirbararka. Sidaadarteed, waa mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta qaran kasta. Inkasta oo sicirbararka Soomaalida aan lagu samayn cilmibaadhis dhammaystiran misana waxa aynu raadraac cilmiyaysan ku samayn doonnaa; sicirbararka Soomaalida, sirtiisa iyo saamayntiisa iyo halka uu sal dhigto, innaga oo ku shidaal qaadanaynna sicirbararka la isla yaqaanno.

Dhibta sicirbararku leeyahay, waxaa uu la bilaamaa qeexitaankiisa. Ma yara qeexitaankiisu, mana jiro mid la isku waafaqsan yahay. Sidaadarteed, waxa aynu iska qaadan doonnaa, mid waaqiciga ku salaysan: sicirbararka waxaa lagu qeexaa; “hab isdabajoog ah oo uu u kordhayo qiimuhu ama hab isdabajoog ah oo u qiima dhacayso lacagtu” (Laidler and Parkin, 1975, p. 741).

Sicirbararku waxa uu la kowsaday oo isku filyihiin lacagta, waana walaxda ugu weyn ee uu ku tiirsan yahay iyo halbeegga lagu garto. Sida uu ku doodo Dhaqaaleyahanka Professor Milton Friedman, oo sicirbararka ku tilmaamay “shaacsane lacageed”. Si kalena haddii aan u idhaahdo waa mid kamid ah xanuunada ku dhaca lacagta. Inta aynaan sicirbararka u gelin, waxaa qasab ah in aynu isla fahamno lacagta oo iyadu fure u ah fahamka iyo furfuridda sicirbararka iyo heerarkii ay soo martay; sooyaal ahaan, sifaadkeeda, shaqadeeda iyo shuruucdeeda.

Bilowgii nolosha Aadanaha, waxaa la billaamay ikhtiraacaad ka dhashay baahidii ka jirtay deegaanka ku xeeran, dabcanna, ganacsigu kama fogeyn xilligaas. Dadkii hore waxa ay lacag ahaan u isticmaali jireen badeecad, badeecad kale lagu beddelay kaas oo loo yaqaan (barter) ama iidoori. Nidaamkaas ku salaysan badeecadaha la is waydaarinayo, waxaa batay dhibtiisa. Tusaale ahaan, waxaa adkayd inaad hesho qof

doonaya waxa aad hayso, ilsamarkaana haya waxa aad doonayso. Waxa kale oo uu nidaamkaasi ku xumaa sarifka oo ma qaybsami jirin, tusaale ahaan haddii aad suuqa keento lax oo aad doonayso kibriid. Waxaa qasab ah inaad is dhaafsataan labadaas shay oo aan isu dhigmin. Sidoo kalena, kaydka ma geli kari jirin. Mar kale ayaa horrumar laga sameeyey lacagta oo waxaa la hindisay, in shay go'an loo isticmaalo lacag ahaan, waxaana loo yaqaan (commodity money), tusaale ahaan, qabiilo la odhan jiray Aztecs oo degi jiray Latin Amerika ayaa lacag ka dhigtay geedka qumbaha, dadkale waxa ay ka dhigteen milixda, kuwo kale hargaha. Qoloba wixii deegaankeeda kula waynaa, ayay lagac ka dhigatay. Nidaamkanna dhibtiisa ayaa batay, oo ma lahayn awood qabsamid "divisibility" sidoo kalena deegaan kama gudbi jirin oo ma lahayn awood gudbid "transferability"- labadan oo dhaqaaleyahanadu rumaysan yihiin in ay aasaas u yihiin ganacsiga. markaas ayay dadku lacag ahaan u isticmaaleen macdanaha kala duwan.

600, oo sanno ka hor dhalashadii Nebi Ciise, ayaa la rumaysan yahay in boqor ka talin jiray Boqortooyadii Lydia (Turki), oo lagu magacaabi jiray King Alyattes in uu sameeyey lacagtii ugu horraysay ee qadaadiic ama bir ka samaysnayd. Taas oo dhexda kaga sawirnaa libaax qaylinaya.

Wixii intaas ka danbeeyeyna, boqortooyooyin kale ayaa samaystay lacago ka samaysan macdanta qaaliga ah (dahab iyo qalin IWM), lacagtan waxaa lagu jaangooyey, culayskeeda, oo hadba inta uu culayskeedu yahay ayuu qiimaheeduna ahaa. Waxaa xusid mudan in lacagahan ka samaysan macdanta qaaliga ahi ay ka shaqayn jirtay meelo ka baxsan meesha laga lahaa, maadaama, macdanta qiimaheeda la isla yaqaano.

Qarnigii 13aad ayaa Boqorkii dalka Shiinaha xukumi jiray ee Ghengis Khan, ayaa sameeyey lacagtii ugu horraysay ee waraaqo ah. Nidaamkaas maaliyadeed ee boqorkaasi dejiyey waxa ay ahayd, in qof ku keensado xaddi macdan ah; dahab ama qalin, dabadeetona, qofka loogu beddelo waraaq ay ku qorantahay culayska dahabkii ama qalinkii. Haddii ay u baahdaan, dahabkoodii ama qalinkoodiina waa loo beddeli jiray.

1661kii, dalka Sweden ayaa laga sameeyey bangigii adduunka ugu horreeyey. Sababtii bangigaas keentayna waxaa lagu sheegaa, sababo amni iyo mooryaan ka dillaacday dhulkaas; kuwaas oo jidgooyo u geli jiray, dadka iska gudbaya deegaanadaas ee sita lacagta macdanta ka samaysnayd. Bangigaasi adeegyada uu qaban jiray, waxaa kamid ahaa in uu dadka u hayo lacagtaas macdanta ka samaysan,

sidoo kalena siiyo, waraaqo tilmaamaya xadiga macdan ee bangiga kuu taal, taas oo ay dusha kaga qoran tahay culayska dahabkii ama qalinkii. Markii ay u baahdaan lacagtoodiina, ay warqadda la yimaadaan oo la siin jiray dahabkoodii ama qalinkoodii.

Sikastaba haahaatee, dadkii bangiga, lacagta macdanta ah dhigtay ee sitay warqadda sharciyaysan ee bangigu siiyey, ayaa bilaabay in ay warqadihii dhexdooda wax ku kala iibsadaan iyaga oo ka wahsanayey, in ay hadba bangiga tagaan oo dahabkoodii soo qaataan. Xilliyadaas ayaa dalka Sweden daabacay lacag sharciyaysan oo lagu jaangooyey, dahabka. Qarnigii 18aad, Ingiriiska ayaa isna samaystay lacag shilimo ah, oo lagu jaangooyey dahabka. Maraykanka ayaa isna la sheegaa, in uu horraantii qarnigii 19aad, lacagtiisa ku jaangooyey dababka.

Wixii intaas ka danbeeyeyna, waddamo badan ayaa samaystay lacago lagu jaangooyey dahabka; oo lacagta waddan daabacanayo waxa ay ku xidhnayd inta dahab ee bangiga dhexe u taalla, ilaa laga soo gaadhayey sannaddii 1933dii.

1933dii Busaaraddii weynayd ee Maraykana ka dhufay, ayuu awoodi kariwaayey in dadkii badnaa ee doollarka doonayey awgeed, inuu lacagtii doollerka ku beddelo dahab. Sidaas awgeedna, kusoo daray in silverka uu lamid yahay dababka.

Julay, 1944kii, ayaa waxaa Maraykanka ka dhacay shir loogu magac daray, shirkii Bretton Woods (Bretton Woods Conference), kaas oo ay kasoo qabgaleen 45 dowladood. Shirkan waxaa gadhwadeen ka ahaa, dalka Maraykanka; u jeedkiisuna waxa uu ahaa in lacagaha dowladaha adduunku lagu jaangooyo, lacagta doollarka. Doollarkana lagu jaangooyo qiimahiisa dahabka. Heshiiskaasna waxaa lagu saxeexay nidaam cusub oo la dhaho, "A Fixed Exchange Rate" kaas oo dhigaya, inaan lacagta doollarka uusan Maraykanku daabacan karin ilaa uu bangigiisa dhexe oolin dahab u dhigma, lacagta uu daabacanayo. $35kii dollar na waxaa qiimo ahaan u dhigmaa 28 garram oo dahab ah.

Isla heshiiskaas waxaa lagu aasaasay, haayadaha maaliyadeed ee IMF " International Monetary Fund" iyo World Bank, kuwaas oo qaabilsan in ay ilaaliyaan nidaamkaas maaliyadeed ee la isla qaatay.

1971, Madaxweynihii dalka Maraykanka Richard Nixon, ayaa heshiiskaas burburiyey; waa nidaamkii "A Fixed Exchange Rate" una guurey " A Flexible Exchange Rate" kaas oo xoriyad u siinaya, Maraykanka in uu daabacan karo lacagta

uu u baahdo, isaga oo aan haysan dahab. Dhacdadaasna waxaa loo yaqaan “Nixon Shock”. Nixon, burburinta heshiiskaas waxa uu kula dagaalamayey shaqo la'aan iyo sicirbarar ka jiray suuqyada Maraykanka. Suuqyada Maraykanka waxaa saamayn ku lahaa, halka doollar ee laga isticmaalo meelo ka baxsan Maraykanka. Wixii intaas ka danbeeyeyna, lacagihii kale iyana waxa ay noqdeen, waraaqo aan qiimo lahayn balse qiimo ku leh sharci dowladeed. Sidaasna lacagtu waxa ay ku jirtay, aasaasiyaadka Aadanaha muddo ku siman 3,000 oo sanno. Waxaana ugu danbaysey, bitcoin oo la aasaasay 2009kii. Oo ah lacag electaroonik ah oo aan u baahnayn in ay marto bangi, waana lacag isticmaalkeedu ku xidhan yahay adeegsiga internetka, markii iigu danbaysay halkii bitcoin waxa uu marayey 11, 000 oo doollar. Haddaba, lacag waxaa lagu qeexaa, shay kasta oo lagu heshiiyey in badeecadaha iyo adeegga lagu kala iibsado, amaahdana la iskugu soo celiyo. Guud ahaan shaqada lacagtu waa saddex: in wax lagu kala iibsado, in kayd ay noqoto muddada fog iyo halbeegga daynta.

Xalka iyo waxa keena sicirbararka.

Sicirbararku waxa uu maraa heerar kala geddisan; heerka ugu khatarsani waa nooca loo yaqaan “hyperinflation”, taas micanaheedu yahay in badewcaduhu halkii maalin isbeddelaan dhowr iyo labaatan jeer. Waxa keena sicirbararka way badanyihiin. Laakiin, waxa aynu taxi doonnaa inta ugu muhiimsan:

1: cost-push inflation: waa sicirbarar uu dabada ka riixayo, qiimaha shaygu uu ku fadhiyo. Saddex mid uun baa keenta. B: in uu qaaligaroobo shayga laga sameeyo ”raw material” T: in shaqaaluhu dalbadaan in mushaharka loo kordhiyo, iyaga oo ka cabsanaya in sicirbarar yimaado. Deetana shirkaduhu sameeya shaqaale-dhimis ayna joojiyaan shaqaalihii cusbaa ee ay qaadan lahaayeen, si ay u bixiyaan mushaharkan ay dalbadeen shaqaaluhu. Taasina waxa ay sababtaa in shaqo la’aantu korodho; haddii shaqo la’aanu korodhana sicirbararku waa kordhaa. J: dhulka oo qaaligarooba. Haddii dhulku qaaligaroobo waa kordhaa sicirbararku. Tusaale shirkadda roodhida samaysa, haddii uu qaali ku yahay dhulka ama guriga ay ku jirto, shirkadu waxa ay samayn in ay qiimaha ku siyaadiso roodhida. Sidaasna uu ku kordho qiimaha roodhida, oo la macno ah in sicirbarar jiro.

2: qodobka labaad ee sicirbararka keena waa waxa dhaqaale ahaan loo yaqaan; Demand-Pull Inflation. Waa marka dad badani ay caydhsanayaan shay isku mid ah. Waana marka lacagta soogasha dadka oo dhami ay korodho, taas oo sare u qaadda awoodda wax iibsiga. Noocan sicirbararka kamid ka ah waxaa kale oo sababa in ay dhacdo, “supply shock” dhinaca taban ah. Tusaale ahaan, waxaa mar keliya yaraday roodhidii suuqa la keeni jiray oo xadi ka yar intii hore ayaa suuqa la keenaa. Sidaadarteed waxaa dhacaysa in ay dadku ku yaacaan inta yar ee suuqa taal, sidaasna ay ku korodho qiimaha roodhida la siinayo, maadaama ay dadbadani doonayaan.

3: sicirbararka waxaa kale oo keena, shirkadaha oo kordhiya qiimaha badeecadaha ama adeeggooda si ay faa’ido badan u helaan. Waana sicirbarar uu dabada ka riixayo faa’ido doon “profit push inflation”. Markan waxaa daruuri noqota in dowladdu farageliso suuqa.

4: qodobka afraadi waa, dowladda oo lacag soo daabacda, iyada oo ku xallinaysa mushkilad dhaqaale oo markaas taagan. Lacagta suuqa taal haddii ay korodho waxaa hoos u dhaca qiimaha lacagta, haddii qiimaha lacagtu hoos u dhaco, qiimaha badeecadaha way kordhayaan, natiijaduna waa sicirbarar. Nasiibdarro, burburkii dalka ka dhacay awgeed, maamulka lacagta waxaa uu gacanta u galay shirkado iyo shakhsiyo iyagu soo daabaca hadba inta lacag ee ay u baahdaan. Awooddii bangiga dhexe ee maamulka lacagtana waxaa la wareegay shirkadahaas iyo shakhsiyaad.

5: waxsoosaarka dalka oo hoos-u-dhac ku yimaaddo. Tusaale ahaan, Soomaalida waxa ugu weyn ee ay dhoofin jirtay waxa ay ahaayeen xoolaha nool, xoolihiina way istaageen. Sidaadarteed sicirbararka ka jira dalka waxaa saamayn weyn ku leh, xoolahaas istaagay; booskoodiina aan la buuxin.

6: sicirbararka waxyaabaha keena, waxaa kale oo kamid ah, daymaha-qaran “national debts”, badanaa waxa ay dhacdaa marka waddamada hormarayaa ay dayn kasoo qaataan waddamada hormaray. Goortii ay bixinayaan daynta, waxaa dhacda in culaysku fuulo bulshadii oo ay ku adkaato in ay iibsan kariwaayaan ama qiimo sare ay ku iibsadaan baahiyaadkii aasaasiga ka ahaa.

7: dagaallada ayaa iyana keena sicirbararka. Xasilloonidarrada siyaasadeed ee ka jirta dal, waxa ay saamayn ku yeelataa waddamada kale ee xidhiidhka ganacsi ka dhexeeyey. Tusaale ahaan dagaalkii uu Maraykanku ku qaaday Ciraaq, waxaa ka dhashay in uu yaraado xaddigii saliidda ee suuqyada caalamka la keenijiray.

8: qodobka Soomaali ahaan sicirbararka innagu keena, waa doollarka. Maadaama oo aynu wax kasta debedda kasoo dhoofsanno, waxaa kordhaysa baahida aad u qabto lacagta doollarka, taas oo jebisa qiimaha lacagta dalka.

Xalka sicirbararka

Sida sicirbararka loo xalliyo, way kala duwan yihiin, waxa aynu ka xusi karnaa qodobadan:

1: in maamulka lacagta la hoosgeeyo bangiga dhexe, sidoo kalena aanay dowladu iska soo daabacan lacag e, ee ay tashiyo kala samayso aqoonyahanka dhaqaalaha iyo haayadaha dowliga ee ay khusayso. 2: waxsoosaarka gudaha oo la dhiirrigeliyo. Laguna dedaalo in waxa aad dhoofiso iyo waxa aad lasoo degtaa ay bataan waxa aad dhoofiso. Sidoo kalena, la maalgeliyo beeraha, kalluunka, xoolaha-nool, macdanta, fooxa iyo beeyada iyo ganacsiga badeecadaha iyo adeegga. 3: in daymaha caalamiga ah la yareeyo, ama la joojiyo. Si dalku uu iskugu filnaado. 4: si kale oo lagu xallinkaro sicirbararka waxa weeye, iyadoo la joojiyo dagaallada iyo xasilloonidarrada siyaasadeed. 5: siyaasadaha lagu la dagaalami karo sicirbararka; ee dowladdu isticmaali karto waxaa kamid ah “monetary policy”, siyaasaddani waxa ay qusaysaa lacagta iyo nidaamka maaliyadeed ee dalka, waana in uu bangiga dhexe uu gaadho go’aamo uu ku xallinayo dhibaatooyinka dhaqaale oo sicirbararku kamid yahay.

6: siyaasadda kale ee dowladu isticmaasho waxaa kamid ah, “fiscal policy” oo ah in ay dowladdu qiimayso kharashaadkeeda iyo cashuurta soo xeroota. Haddii ay badantahay lacagta suuqa dhex wareegaysaa, dowladdu waxa ay kordhinaysaa cashuurta iyadoo islamarkaana dhimaysa kharashaadkeeda.

7: siyaasadda ugu danbaysa ee dowladdu kula dagaallami karto sicirbararka waa “exchange rate policy”, waana in dowladdu kor-u-qaado qiimaha lacagteeda, taas oo shillinka ka dhigaysa mid wax badan jaraya.

Tixraac

Glyn, D. (1994). A History of Money: From Ancient Times to the Present Day. Economic Affairs (Vol. 23). https://doi.org/10.1111/j.1468-0270.2003.0448b.x.

Policy, M. (1978). Inflation and monetary policy 27, 10–15.

Moggridge, D. E. (2002). Money and Inflation. Harry Johnson, 333–359. https://doi.org/10.1017/CBO9780511510731.016

Parsson, J. O. (1923). Dying of Money: Lessons of the Great German and American Inflations. Taxes, 1–158.

Chown, J. (1996). A history of money from AD 800.

HENRY HAZLITT,(1978), THE INFLATION CRISIS, AND HOW TO RESOLVE IT.

Victor. C. Shih(2008), Factions and Finance in China: Elite Conflict and Inflation. Northwestern University.

https://www.ukessays.com/essays/economics/the-causes-and-possible-solutions-of-inflation-economics-essay.php.

http://www.economist.com/node/15663312.